GUDDIGA BAARLAMAANKA EE DIB-U-QAABAYNTA
SHARCIGA FIKTOORIYA

ARAGTIDA DHAARAHA IYO WACADYADA EE JAALLIYADAHA DHAQANKA AHAAN KALA-DUWAN

SHURUUDAHA TIXRAACA

Guddiga Dib-qaabaynta Sharciga Baarlamaanka ee Fiktooriya ayaa waxaa weydiistey golaha Sharcisamaynta Baarlamaanka inay baaraan nadaamka dhaaraha iyo wacadyada lagu samaynayo maxkamaddaha Fiktooriya iyo samaynta statutory declarations-ka iyo affidavits-ka iyadoo la eegayo aragtida *jaalliyadaha dhaqamada kala-duwan*. Khaasatan guddigu waxa uu tixgeliynayaa arrimaha ay ka midka yihiin, aanse ku koobnayn:

(a) Muhiimada kutubtu u leedahay markhaantiyada, qaybaha kale iyo xubnaha juuriga leh caqiidooyin mucayina;

(b) Bixinta kutub ku haboon oo kala duwan iyo heerka ugu yar awooda meelmarinta ee dhamaan dadka reer Fiktooriya;

(c) Bixinta tababarka ogaanshaha dhaqanka dhamaan shaqaalaha maxkamadda iyo dadka affidavits-ka loogu dhaarto iyo horumarinta waxqabadka xasaasiga ah ee ku haboon ee dadkaas dhamaantiis; iyo

(d) Haddii dadka dabaqadaha ama kooxaha dhowaan loo ogolaaday inay markhaanti ka noqdaan affidavits-ka iyo Statutory declarations-ka loo helli karo si sahlan, kana tarjumaysa, kala-duwanaanshaha dadka reer Fiktooriya.

Xaashidaan macluumaadka waxaa loogu talagalay inay caawinto ururada iyo shakhsiyaadka doonaya inay soo gudbiyaan warqad qoran iyo/ama kuwa jeclaan lahaa inay siiyaan guddiga cadayn afka ah maxkamad dadweyne horteed. Su'aallaha warqadaan waxaa looga jeedaa keliya arrimaha muujinaya in Guddigu qadarin doono aana loo qaadan wax hawl badan loo maro.

SHARCIGA HADDA JIRA EE DHAARAHA IYO CADAYMAHA

Intaan maxkamada ama taraybuunalka la siin markhaanti afka ah waa inuu markhaantigu dhaartaa ama galaa wacad in cadaynta uu bixin doonaa ay tahay run. Dhaarta ama wacadka waxaa iyana looga baahan yahay xubnaha juuriga ama dadka siinaya cadayn qoran maxkamada (qaabka affidavit-ka hoos lagaga hadlay). Sidaas awgeed dhaartii ama wacadkii wuxuu noqonayaa arrin sharci ah oo lagu xaqiijiyo runta qofka cadaynta bixinaya.

Meesha laga soo minguuriyey ama laga qaatay sharciga Fiktooriya ee nadaamka dhaaraha ama dhaar samaynta iyo samaynta affidavit-ka iyo statutory declarations-ku waa *Xeerka cadaynta* 1958 (Vic).

Ku dhaarashada Kitaabka

Dariiqada asaasiga ah ee dhaartu waa in lagu dhaartaa kitaabka, iyadoo laga bilaabayo eraya ah "waxaan ku dhaaranayaa Ilaaha Awooda leh" iyadoo waafaqsan xeerka cadaynta, sarkaalka maxkamadu waa inuu u qaadaa dhaartaa habkaan "suaal laáan".

Haddii qofka ay tahay in la dhaariyaa aanu ahayn mid diidan inuu iskiis ugu dhaartu kitaabka (ama aanu ahayn qof aan samayn karin awood ahaan); ama

- Haddii aanay ahayn in sarkaalka maxkamadu haysto sababa uu ugu maleeyo in qaabka caadiga ah ee dhaartu (ku dhaarashada kitaabku) aanu ahayn mid la iska rabo iyadoo ku xiran damiirka qofka ay tahay in la dhaariyo.

Si kasta ha ahaatee, *xeerka cadaynta* ayaa ogolaanaya in dhaarta lagu sameeyo si ku haboon caqiidada qofka la dhaarinayo. Xeerku wuxuu sheegay: "dhaar kasta waxaa laga yaabaa in lagu sameeyo hab kasta oo hadda sharci ah". Qaababka kala duwan oo dhaartu qaadan karto xaalladaha kala-duwan laguma qeexin xeerka laakiin waxaa laga yaabaa inuu ku jiro tusaha nadaamiyaha shaqaalaha, kuwa la shaqeeya iyo kuwa kale oo loo sharciyeyey inay qaadaan dhaarta iyo wacadka.

Samaynta Cadaynta

Xeerka Cadayntu wuxuu u ogolaadaa markhaantiyada iyo kuwa kale inay qaadaan wacad halkii ay ka dhaaran lahaayeen taas oo:

- Ama qofku diido in la dhaariyo; ama

- Aanay jirin duruufa macquul ahaan suurta gelinaya iyadoo aan wax u dhimayn ama daahinayn ka qaadida dhaarta qofka hab ku haboon caqiidadiisa.

Wacadka kutub lama adeegsanayo ama kitaab kale oo diimeed. Intii la oran lahaa “waxaan ku dhaartay Ilaaha awooda leh”, qofku wuxuu ka bilaabayaa erayada “ Annigoo ah A.B, si dhab ah, daacad ah, run na ah waxaan wacad ugu geliyaa….”.

Xeerka cadayntu wuxuu sheegayaa in wacadku leeyahay awooda markuu qofku ku dhaarto kitaabka. Waa muhiim in la ogaado in qofka dhaaranayaa aanu lahayn aaminaad caqiido oo wax u dhimaysa qiimaha dhaarta.

ARRIMAHA LAGA WADA HADLAYO

Inta aan la baarin afarta qaybood ee shuruudaha tixraaca, waa muhiim in la qadariyo xaalladaha caalamka ee saamayn kara goáanada Baaritaanka. Suáasha ugu muhiimsan ee Guddigu qadarinayaa waxaa weeye in aan sii wadno dhaarta caqiidada la xiriirta iyo in nadaamka dhaarta kitaabka lagu bedelo kan wacadka ah ama ballanqaad dhab ah si run loo sheego.

Suáallaha ugu muhiimsan adduunka

Ma u malaynaysaa in:

- In shuruucda hadda ah ee *Xeerka Cadayntu* haboon yahay? (sida ku dhaarashada kitaabka oo asal u ah dhaarta laakiin la aqbalo dhaaraha diimaha iyo wacadka).

- Dhaarta kitaabka lagu dhaartu ma in meesha laga saaro aana loo arag mid asaas u ah dhaarta tixraacna loo sameeyo dhaarta ku haboon diinta oo qofka damiirkiisa xakumaysa miyaa?

- Nadaamka kitaab ku dhaarashadu (kitaabkuu doono ha haadee) ma in lagu bedelaa wacad aan diin la xiriirin ama ballanqaadka dhabta ah ku salaysan si runta loo sheego?

Macnaha kutubta iyo markhaantiyada, qaybaha kale, iyo xubnaha juuriga ee caqiidada gaarka ah.

Qaybtaan Waxweydiinta ah Guddigu waxay qadarin doonaan cadaynta *muhiimada uu kitaabku u leeyahay dadka kitaabada kala-duwan* marka loo yeero inay dhaartaan. Guddigu wuxuu si gaara u xiisaynayaa in ay hellan tacliiq ama faallo ku saabsan suaallaha hoos lagu muujiyey.

- Sidee muhiim u tahay in dadku awoodaan inay ku dhaartaan kitaabka diintooda? Masalan, xubnaha koox dhaqan iyo diimeed ma aaminsan yihiin in dhaarta kitaabka ama wacadku aanu macna u samaynayn diintooda gaarka ah xagga damiirkooda? Dadku ma qadariyaan ku dhaarashada caqiidada ku haboon in ay tahay muujinta xoriyadooda ah ku dhaqanka diintooda?

- Waa maxay falalka la xiriira ku dhaarashada kitaabka? Masalan, ma jiraan munaasabada diineed ama qaab loo qabto kitaabka kaas oo ay waajib tahay in loo sameeyo si ay aanay u burin dhaartu? Ilaa intee ayey xaakimada, saraakiisha maxkamadaha iyo kuwa kaleeto u fahmaan una ixtiraamaan falalkaas?

Bixinta kitaaba ku filan iyo heerarka ugu hooseeya ee hayádaha ugu hooseeya dhamaan sharciga ee Fiktooriya

Qaybtaan Waxweydiinta Guddigu wuxuu qadarin doonaa haddii ay jiraan hadda *kutubo noocyaa badan ah iyo awaamiirta la xiriirta* oo loo isticmaalo buugaagta iyo munaasabadaha la xiriira ee maxkamaddaha Fiktooriya. Waxa kaloo la eegi doonaa sida loo helli karo kitaaba heerar noocaas ah oo ku haboon oo hadda ah, waana waajib, in ay diyaar ka dhigaan kuwa kale oo u idman inay markhaanti ka noqdaan dhaarta affidavit-ka (sida garyaqaano, justice of Peace, xubnaha booliiska, xubnaha baarlamaanka iwm) Guddigu wuxuu jeclaan lahaa inuu maqlo aragtida ku saabsan markhaantiyada ee suáallaha soo socda iyo arrimaha kale ee la xiriira:

- Kutuba noocee ah ayaa hadda laga hellaa maxkamadaha Fiktooriya? Ku dhaqmidu ma isbedeshaa iyadoo ku xiran maxkamadahaas? Kutuba noocee ah ayaa laga helli karaa garyaqaanada iyo kuwa kale oo loo idmay inay ka markhaanti furaan affidavits-ka?

- Haddii aad u malaynaso inay tahay in kutubada laga hello, kuwama ayay waajib tahay, ugu yaraan, in la dhigo maxkamadaha loona idmo garyaqaanada iyo kuwa kale si ay uga markhaanti noqdaan dhaarta affidavit-k?

- Kuwee kale (hadday jiraanba) ayey heerkeeda ugu hooseeya tahay si loo sameeyo dhaarta iyo wacadka dadka leh dhaqan iyo diina gaara? Masalan, maxkamaduhu ma siinayaan macluumaad markhaantiyada, juuriga iwm siyaallaha kaleeto ee ay dhaarta ku samayn karaan?

Bixinta tababarka ogaanshaha dhaqanka dhamaan shaqaalaha maxkamada iyo dadka loogu dhaarto affidavit-ka

- Qaybtaan Waxweydiinta guddigu waxay eegi doonaan tababarka aqoonta dhaqanka ee la siiyey xaakimada, shaqaalaha maxkamada iyo kuwa kale ee u idman qaadida (ama, arrinta xaakimadu, goáan ku sameeyaan iyagoo sal uga dhigaya) dhaaraha, wacadka iyo affidavit-ka.

- Waa maxay , haddayba jirto, tababarka dhaqan ee hadda la siiyey xaakimada iyo shaqaalaha maxkamada? Ma jiraa wax tababar ah mase jiraa wax awaamiira oo si gaara loogu jiheeyey sida dhaaraha iyo wacadka ay u qaadayaan dadka qaada sida kuwa aan diintoodu masiixiga ahayn?

- Waa maxay, hadduuba jiro, tababarka ogaanshaha dhaqan oo hadda la siiyey Justice of peace, booliiska, garyaqaanada, xubnaha baarlamaanka, kuwa qoraallada u diyaariya dadweynaha iyo dadka affidavit-ka hortooda loogu dhaarto (ama wacadka lagu qaado)?

- Tababarka intee leég yahay ayaa la bixiyaa? Sidee loo wanaajin karaa? Ma bixin kartaa masaal aad u fiican oo ay bixiyeen shaqaalaha maxkamada iyo kuwa kale oo hortooda lagu sameeyo dhaarta affidavits-ka ama wacadka?

- Ilaa intee in leég ayaa dadka ka tirsan qawmiyadaha kala-duwan oo leh caadooyin iyo dhaqama kale ka fahmaan ujeedada dhaarta ama gelida wacadka? Mase loo sharxay macnaha dhaarta? Ma loo sheegay xaqooda si ay u qaataan dhaarta ama wacadka dhaqan ahaan ku haboon?

- Ma ka bixin kartaa tusaale xaalladaha marka dhaarta ama wacadka markhaantiga ama juuriga ama qayba kala loolameen (qofka samaynaya dhaarta ama dabadeed la taliyaha inta maxkamadu socoto) in aanay ka tarjumin markhaantiga diintiisa (masalan marka Budhiistuhu ku dhaarto kitaabka masiixiga, sida ka dhacday goáan laga gaaray maxkamada la sheegay) ama haddii kale xusida in markhaantigu aanu runta ka sheegin (masalan, ku salaysan waxa laga haysato qawminimada)? Sidee u samaynayaan waajibna ugu tahay saraakiisha maxkamada iyo kuwa kale inay goáan ka gaaraan haddii dhaartu tahay mid meelmar ah xagga damiirka markhaantiga?

Hellitaanka iyo kala-duwanaanta noocyada dadka loo ogol yahay inay ka markhaanti furaan Statutory declarations-ka

Affidavits-ku waa dokumenti badanaa ka kooban cadayn qoran oo loo isticmaalayo maxkamada la qaadayo. Dadkaan (oo loo yaqaan "markhaantiyaal") waxaa waajib ku ah inay ku dhaartaan ama wacad ku qaadaan affidavit-kooda si guud ahaan ula mid ah qaadida dhaar ama wacad ka hor markhaanti afka ah.

Statutory declaration-ku waa baaq lagu sameeyey qoraal. Waxay kaga duwan tahay affidavits-ka, statutory declaration-ka lagu dhaaran mayo ama wacad lagu gelimaayo laakiinse markhaantigu wuxuu sameeyaa baaqa ballanqaadka in qoraalka lagu sameeyey statutory declaration-ku yahay run.

Xeerka cadayntu (The *Evidence Act)* wuxuu sameeyaa liiska dadka laga yaabo inay markhaanti ka noqdaan saxiixida statutory declaration-ka. Kuwaas waxaa ku jira justice of peace, garyaqaano, saraakiisha maxkamadaha, xubnaha golaha degmada, maamulayaasha degmada, maamulayaasha bangiyada, madaxda diimaha iyo kuwa badan oo aqoon leh sida dhakhtarada, dhakhtarada ilkaha, dhakhtarka xoollaha iyo farmashiistaha.

Noocyada dadka oo awooda inay markhaanti ka noqdaan affidavit-ku waa xadadan yihiin in kastoo ay ku jiraan xaakimada dabaqad siyaada ah, dadka xaakimada la shaqeeya, qolyaha diimaha iyo kuwa iyaga la shaqeeya. Waxaa kaloo ku jira justice of peace ama wadaadka damiinta, saraakiil cayiman oo maxkamada dhowra, dadka horay uga tirsanaan jiray baarlamaanka ama hadda ku jira, garyaqaano, dadka dadweynaha wax qora, saraakiisha booliiska qaarkood iyo saraakiisha ka shaqaysa golaha degmada. Si kasta arrini ha ahaatee, kooxaha aqoonyahanada badankood kuwaas oo xubnahooda loo idmay inay ka markhaanti kacaan statutory declarations-ka (ayna ku jiraan dhakhaatiir, dhakhtarka xoollaha, farmashiiste, maamulaha dugsiga, maamulaha bangiga, madaxda diimaha iwm) looma ogola inay saxiixaan affidavits-ka. Marka lagu daro kooxdaan, xeerku wuxuu ogolaanayaa inay dadka xiran u saxiixaan kuwa xabsiga ilaaliyaa ama "xabsiga ka shaqeeya".

- Dadka ka tirsan dabaqadaha hadda si fiican ma u helli karaan jaalliyadaha qawmiyadaha kala-duwani? Ma fahamtay mase ixtiraamtaa cibaadaysiga diimaha jaalliyadaha qawmiyada kala-duwan?

- Ma u malaynaysaa in dadka ka tirsan dadka leh dhaqama ay hadda si fiican uga tirsan dabaqadaha dadka?

- Dadka dabaqadaha hadda ah ma la kordhiyaa hadday sidaas tahayse, kooxehee ayaa loo ogolaadaa inay markhaanti ka noqdaan affidavits-ka iyo statutory declarations-ka?

Ingiriiska luqad labaad ahaan iyo arrima kale

Guddigu waxay jeclaan lahaayeen inay maqlaan aragtidaada arrimaha ku saabsan weaxweydiintaan, (oo ay ku jiraan aanse ku koobnayn) kuwan hoos ku qoran.

- Sidee sax u tahay una haboon tahay tarjumada qoraalada dhaarta diimaha kala duwan?

- Maxaa loo qabtay dadka ingiriisku afkooda labaad yahay? Mutarjumiin diyaar ma laga dhigay ku dhaarashada kitaabka iyo affidavits-ka?

- Ma jirtaa dhibaato *lala xiriiriyo qawmiyad* ama isku *lifaaqida qawmiyad iyo diin*? Masalan ma laga sameeyaa malle qawmiyad gaara oo leh diin gaara?

- Maxaad u malaynaysaa muranka ku saabsan ku dhaarashada kitaabka oo laga dhigo waxa ugu weyn oo lagu dhaarto iyadoo sabab looga dhigayo inay tani tahay qayb ka mid ah caadada dhaqanka oo weli aad loogaga dhaqmo Australia?

SOO QADIMIDA

Ma jiro hab mucayina oo lagu diyaarinayo ama lagu soo qadimayo qoraalka. Waxaa laga yaabaa inaad soo qadinto warqad, warbixin gaaban ama faallo amaba qoraal baaritaan oo dheer. Qalabna aad soo darto, sida fiidiyo, muuqaallo ama sawiro, kuwaasna waa la wada aqbalay waxaana laguu soo celin karaa dhamaadka waxweydiinta.

Guddigu wuxuu ku weydiisanayaa, si uu kuu caawimo, inaad u soo dirto warqad saxiixan Xafiiska Guddiga maalinta ugu dambeysa, taas oo ah warqad qoran, cajlad ama email, kuwaas oo ay la socoto saxiixaaga oo la soo tasdiiqay.

Haddii aad u saxiixayso urur, fadlan muuji jagadaada ururka iyo/ama qofka idmay warqada la soo gudbinayo.

Qarsoodi Confidentiality

Dhamaan wixii la soo gudbinayo oo dhan waxaa loo arkayaa dokumenti dadweyne haddii aan la codsan in laga dhigo qarsoodi. Guddigu waxaa laga yaabaa inay warqadaha ka dhigaan kuwa dadweynuhu helli karo wayna daabici karaan warqadaha iyo waxay ka soo qaateen iyagoo u madaxbanaan.

Guddiga waxaa ujeedadiisu tahay inay ka dhigaan wixii loo soo diray mid laga helli karo website-ka. Haddii aad doonayso in qayb ka mid ah qoraalkaaga ama dhamaantiis uu ahaado qarsoodi, fadlan sheeg arrintaas markaad warqadaada qadimayso. Guddiga ayaa kula socodsiin doona goáankiisa. Haddii aad doonayso inaad daabacdo warqadaada waxweydiinta waxaa waajiba inaad hesho aqbalaada Guddiga,

awooda-gaarka ah ee baarlamaanka

Warqadaha iyo qoraallada laga dhigo kuwa dadku helli karaan waxaa lagu xafiday awooda-gaarka ah ee baarlamaanka taas macneheedu waxa weeye wax kasta oo la soo qoro ma keeni karaan ficil maxkamadeed oo lid ku ah qoraha ama keeni kara sharci maxkameed.

Xubnaha Guddiga Dib-u-qaabaynta Sharciga

Mr Murray Thompson, MLA (Guddoomiye)
Hon Dianne Hadden, MLC (Guddoomiye ku Xigeen**)**
Hon Ron Bowden MLC
Hon Peter Katsambanis, MLC
Mr Telmo Languiller, MLA
Ms Andrea McCall, MLA
Mr Bob Stensholt, MLA

Jadwalka Waxweydiinta

Waxay ku egyihiin qabashada warqaduhu **19ka Juulay 2002.** Guddigu wuxuu qorshaynayaa inuu qabto dhegaysiga dadweynaha 1da-2da Agoosto 2002. Si aad u samaysato ballan aad kaga hadasho fadlan la xiriir Guddiga Xoghaynta.

Faahfaahinta cida lala xiriirayo Contact Details

Fadlan la xiriir xighaynta tel: 03 9651 3644 wixii macluumaada ee intaas ka badan. **Waa in lagu soo diraa wixii la soo dirayo cinwaanka ah**:

Executive Officer
Victorian Parliament Law Reform Committee
Level 8, 35 Spring Street
Melbourne 3004.
Email: VPLRC@parliament.vic.gov.au
Tel: (03) 9651 3644 Fakis: (03) 9651 3674.